

Daniel Haile-Michael & Ors v Nick Konstantinidis & Ors  
VID 969 of 2010

**SOO KOOBIDA WARBIXINTA KOOWAAD EE PROFESSOR GORDON'S  
IYO DR HENSTRIDGE**

Iyadoo ay dabasocoto amarka soo saarida ee Maars 2012, eedeysanihii sideedaad wuxuu diyaariyey tiro faylal ah oo ka koobnaa tira koobka keydka maclumaaka LEAP booliska Victoria ee la xiriira dhammaan ragga degan Flemington ama North Melbourne sannadiihii 2005-2008, ee dhashay inta u dhaxeysa 1 Janaayo 1987 ilaa 1 Janaayo 1993, oo wakhtigaas xiriir la yeeshay sarkaal ka tirsan ciidama booliska Victoria. Professor Gordon wuxuu baaritaan ku sameeyey maclumaadkan wuxuuna helay waxyaalahaan soo socda:

- (a) Boqolkiiba ragga jinsiyada Afrikaanka ah ee sheegay diiwaangashan inay ahaayeen ujeedada "xiriirka hawlgalka" ee maclumaadka LEAP ka (oo ah (43%) waxay 2.4 jeer ay ka badnaayeen boqolkiiba ragga degan Flemington iyo North Melboourne ee ka soo jeeda Afrikaan marka loo eego tira koobka 2006 ( oo ah ( 18%).

Sida kale , ragga la gaar yeelay ee jinsiyada Afrikaanka leh qiyaastii waxay ka badnaayeen laba iyo bar inay xiriir la lahaayeen booliska diiwaanka ee booliska marka loo eego sida tiradoodu sheegayso inay arintu ahaato.

Helitaankani tiro koob ahaan waa xasaasi lama na socdo farqiga teel teelka ah marka loo eego Profesar Gordon. Dr John Henstridge, oo ah nin aqoon u leh tira koobka wuxuu ku adkeystay in sideedaad iyo sagaalaad ka ah dacweysanayaashu inay ogol yihiin waxaan la helay.

- (b) Tirada celceliska ee dembiyada ee ragga jinsiyada Afrikaanka ah ee la gaar yeelay (oo ah, 7.8 dembi) si xooggan ayey uga hooseysay ragga la gaaryeelay ee jinsiyad kasta oo kale (oo ah, 12.3 dembi). Professor Gordon wuxuu helay in helitaankani inuu sidoo kale tiro koob ahaan uu si xoogan muhiim u yahay.

Siyaalo kale haddii loo eego, marka la eego diiwaanka booliska Victoria ee diiwaanka LEAP, ragga Afrikaanka ah ee la gaar yeelay goobtaas waxaa lagu dacweynayey inay galeen dembiyo aad uga yar, celcelis ahaan ragga kale ee ka soo jeeda asalada jinsiyadeed ee kale.

Dr Henstridge wuxuu ogolaaday in Professor Gordon helitaankiisa ( inkastoo uu su'aalo weydiinayo ku saabsan xajmiga inta ay le'egtay farqiga tiradu).

- (c) Ragga la gaar yeelay ee ah lagu dacweeyey dembiilayaalka aan ahayn jinsiyada Afrikaanka ah waxay ahaayeen 8.5 jeer kuwa uga eg inaysan lagu sameyn "xiriirka hawsha" marka loo eego dembiilayaasha jinsiyada Afrikaanka ka soo jeeda, kaas oo intuu ka yahay uu si xooggan tiro ahaan muhiim u yahay marka loo eego Professor Gordon. Dr Henstridge mar labaad wuxuu ogolaaday wuxuu helay Professor Gordon. Professor Andrew Goldsmith, dembi baare wuxuu ku adkeystay in dacweysanayaasha sideedaad iyo sagaalaad, inay sharxayaan tira koobkan sidii marka ugu horeysay "ka horyimid".

- (d) Marka ragga la sheegay ay la kulmeen "xiriirka hawleed" Professor Gordon wuxuu helay inay jirtay farqi aad u sareeya tiro ahaan oo u dhaxeeya inta jeer ee oraaho khaas ahi (oo ah, "koox dembiilayaal ah", "wax sabab ah lahayn", "sabab aan jirin", "ka soco", iyo "qaab aan fiicneyn") uu ku isticmaalay boolisku jinsiyada Afrikaanka ah , marka la barbar dhigo wakhtiyoo kale oraahyadaas loo isticmaalay kuwa ah jinsiyad kasta oo kale. Boqolkiiba faalada xiriirka goob hawleedka.

Ka kooban haddaladan ee xiriirada goobta ee la xiriira raga sheegay ee jinsiyada Afrikaanka ah waxay ahayd 16%, marka la barbardhigo 10% xiriirada goobta ee la xiriira raga la sheegay ee jinsiyadaha kale.

Sida kale, boliiska tiro koob ahaan way u ekeyd in badan inay isticmaalayaan oraahdaan diwaankooda xiriirka ee raga la sheegay ee jinsiyada Africaanka marka la barbardhigo dhammaan raga jinsiyadaha kale.

Meesha Dr Henstridge uu su'aalo ka weydiinayo weynaanta farqiga xajmiga tiro koobka, wuuna ogolaaday in farqigaasi jiro.